HALLINGDAL
RENOVASJON

Toddobaadkiiba hal mar ayaan gurigaaga qashinka ka soo qaadaynaa. Kalandarka ayaad ka arkaysaa toddobaadka qashinka aan qaadayno. Qashinka afar nooc ayaa loo kala qaybiyaa. Qashin haraa ah, biraha iyo dhalooyinka alaabaha lagu rito, warqad/baakad/kaartoonka cabbitaanka iyo balaastigga guryaha lagu isticmaalo. Balaastigga guryaha lagu isticmaalo waxaa lagu keenayaa bac gaar ah oo geeska jaallaha ah laga surayo tanagga loogu tala galay warqadaha/baakadaha/kartoonnada cabbitaanka.

In qashinka la kala sooco waa muhiim si aad boos ugu hesho qashinka haraaga ah. Qashinka aan tanagyada ku jirin la qaadi maayo. Maalinta aan qashinka qaadayno waa in tanagyada qashinka la dhigaa meel ugu badnaan 5 mitir u jirta meesha uu gaariga qashinku istaago. Waa in barafka la xaaqaa si ay qofka qashinka qaadaya ugu fududaato in uu tanagga qaado. Haddii ay meeshu sibibix tahay waa in lagu shubaa wax sibibixa ka baabbi'iya.

Qalabkan ayaa loo baahan yahay in uu qof walba haysto. Santuukha guduudan waxaad ku aruurinaysaa qashinka khatarta ah ee kala duwan sida batariga, riinjiga, guluubyada iyo waxyaalaha yaryar ee elektaroonigga ah. Marka uu santuukhu buuxsamo ayaad gaynaysaa goobta qashinka la geeyo ee kuugu dhow. Nala soo xiriir haddii aadan haysan qaar qalabkaan ka mid ah.

Dhammaan noocyada kale ee qashinka ah waxaa bilaash lagu geyn karaa goobta qashinka ee kuugu dhow. Kuwaan waxaa tusaale ahaan ka mid ah saabaanka, baakad weyn oo kuwa wax lagu duubo ah, biraha, qalabka elektaroonigga ah, qashinka dhismaha, qashinka ardaagga guriga iwm. Iyo qashinka khatarta ah sida riinjiga, batariga, guluubyada iwm.






# HALLINGDAL RENOVASJON

# Kalandarka faaruqinta julaay - decembar

## Julaay

| Isbuuc | Isniin (Nesbyen Krødsherad*) | Talaado (Gol Flå) | Arbaco (Hol Krødsherad**) | Khamiis (Ål) | Jimco (Hemsedal) | Sabti |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 26 | | | | | 1 | 2 |
| 27 Qaadasho ma leh | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 |
| 28 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | |
| 29 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | |
| 30 | 2526 | 27 | 28 | 29 | 30 | |

## Ogosto

| Isbuuc | Isniin (Nesbyen Krødsherad*) | Talaado (Gol Flå) | Arbaco (Hol Krødsherad**) | Khamiis (Ål) | Jimco (Hemsedal) | Sabti |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 31 | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 |
| 32 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 |
| 33 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 |
| 34 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 |
| 35 Qaadasho ma leh | 29 | 30 | 31 | | | |

## Sebtembar

| Isbuuc | Isniin (Nesbyen Krødsherad*) | Talaado (Gol Flå) | Arbaco (Hol Krødsherad**) | Khamiis (Ål) | Jimco (Hemsedal) | Sabti |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 35 Qaadasho ma leh | | | | 1 | 2 | 3 |
| 36 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| 37 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 |
| 38 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 |
| 39 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | |

## Oktoobar

| Isbuuc | Isniin (Nesbyen Krødsherad*) | Talaado (Gol Flå) | Arbaco (Hol Krødsherad**) | Khamiis (Ål) | Jimco (Hemsedal) | Sabti |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 39 | | | | | | 1 |
| 40 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 |
| 41 | 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 |
| 42 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 |
| 43 Qaadasho ma leh | 24 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 |
| 44 | 31 | | | | | |

## Nofeembar

| Isbuuc | Isniin (Nesbyen Krødsherad*) | Talaado (Gol Flå) | Arbaco (Hol Krødsherad**) | Khamiis (Ål) | Jimco (Hemsedal) | Sabti |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 44 | | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| 45 | 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 |
| 46 | 14 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 |
| 47 | 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 |
| 48 | 28 | 29 | 30 | | | |

## Decembar

| Isbuuc | Isniin (Nesbyen Krødsherad*) | Talaado (Gol Flå) | Arbaco (Hol Krødsherad**) | Khamiis (Ål) | Jimco (Hemsedal) | Sabti |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 48 | | | | 1 | 2 | 3 |
| 49 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| 50 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 |
| 51 Qaadasho ma leh | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 |
| 52 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | 31 |

= QASHINKA HARAY

= DHALO + BAAKADDA BIRTA

= WARQAD IYO KARTOON + CAAGA ISTICMAALKA GURIGA

= QAADASHO MA LEH

* **Jidka Isniinta ee Krødsherad:** Flå grense - Sole Hotell / Fv 192 Noresund-Ringnes isgoyska Båtastua
** **Waddada Arbacada ee Krødsherad:** Xuduudaha Olberg-Ringerike iyo Modum. Fv 191 Krøderen - Xuduudka Sigdal

HALLINGDAL RENOVASJON

## Hagaha kala soocidda qashinka – maxay iyo sidee?

### QASHIN HARAA AH

Raashin haraa ah
Bacaha shaaha
Warqadda kafeega lagu miiray
Warqadaha iyo baakadaha kushiinka ee la isticmaalay
Xafaayado
Dhar, kabo
Dhirta guryaha/ubax

Qashinka haraaga ah inta bac ku riddid afka ka xir, si ay u ficnaato nadaafadda tanagyada qashinka ee laguha leh.

### WARQADO IYO BAAKADO

Warqado, wargeysyo iyo iidheh
Baakado yaryar
Kaartoonnada caanaha -/ cabbitaanka
Baakadaha alaabaha lagu duubto
Waraaqaha xafiisyada,
Bokhshadaha
Qoriga ay ku duuban yihiin warqadaha faraha lagu qallajisto

Tanagga ayaa iyaga oo sidooda ah lagu ridayaa.
Balaastig ama baco warqado ah oo qashinka agagaarkiisa yaalla waxay hallaynayaan kala soocidda.

Ha ku ridin buugaag gal adag leh

### QASHINKA GURIGA EE BALAASTIGGA AH

Bacaha balaastigga ah, bacaha iyo bacaha aluuminiyamka ah ee waxyaalaha baakadaysan sida bacaha rootiga ee balaastigga ah, baakadaha cuntada lagu duubto iwm.
Dhalooyinka iyo weelasha balaastigga ah ee cuntada, daawooyinka wax lagu dhaqo iyo waxyaalaga jirka la marsado iwm.
Dhalooyinka balaastigga ah ee cabbitaanka marka laga reebo kuwa dib loo celiyo ee lacagta laysu celiyo.
Weelasha yoogarka iyo rommaha iwm.
Baakadaha furuutka, qudaarta iyo hilibka.
Weelasha ubaxa la geliyo iyo baakadaha.
Inta biyo la raaciyo ayaa tartiib loogu ridayaa jawaan, jawaankana maalinta qashinka la qaadayo ayaa la surayaa geeska tanagga qashinka. Balaastigga wasakhda leh waxaa lagu darayaa qashinka haraaga ah.
Waxyaalaha aan wax ku duubnayn ee uu taabtay qashin halis ah ama balaastigga adag iyo jawaannada xaabada. Kuwaas waxaa la geynayaa xarunta qashinka la geeyo ee kuugu dhow
.

### DHALADA/ BIRAHA ALAABAHA LAGU RITO

Dhalooyinka sida kuwa malmalaaddada ee daboolka leh
Dhalooyinka iyo qasacadaha cabbitaanka
Qasacadaha birta ah ee raashinka
Waraaqaha iyo weelasha aluminiyumka ka samaysan

Iyaga oo sidooda ah ayaa tanagga lagu ridayaa. Balaastig ama baco warqado ah oo qashinka agagaarkiisa yaalla waxay hallaynayaan kala soocidda.

Lama oggola dhoobo,
dhoobo
nooc quraarad ah,
koobabka cabbitaanka
muraayad, weelka dhalada ah ee cuntada lagu foorneeyo ama
daaqado.
Kuwan waxaa la geynayaa goobta qashinka lagu tuuro ee kuugu dhow